TURKU

OMAKIELINEN KOULUSANASTO / ERAYADDA ISKUULKA LOO ISTICMAALO OO TURJUMAN

AAMU- JA ILTAPÄIVÄTOIMINTA / ISKUULKA KA HOR IYO KA DIB HAYNTA ARDAYDDA

Subixii iskuulka inta uu bilaaban ama marka uu dhamaado xisahada, waxa fasaladda 1 iyo 2 ama ardaydda u baahan caawi-maad dheeraad ah loo diyaariyay meel ay kusii sugaan iskuulka ama soo aadidda gurigga, waana lacag meeshaas.

ALKUOPETUS / WAXBARASHADDA BILOWGA AH

Waxbarashadda bilowga ah waa fasaladda kowaad iyo labaad (1 iyo 2)

ERITYISOPETUS / WAXBARASHO KHAAS AH

Waxbarashadda khaaska ah waxaa la siiyaa ardayga ay ku adag tahay waxbarshadu ama iskuulka.

ESIOPETUS / WAXBARASHA CARBISKA (BILOWGA)

Waxbarashadda carbiska caruurta waxaa loo bilaabaa inta ay iskuulka bilaabin waana lacag la`aan.

HUOLTAJA / WAALID

waalidku waa qof caruurta koriimadoodda mas`uulka ka ah, waalidkana waxaa noqon kara aabe/ hooyo.

JÄRJESTYSSÄÄNNÖT / XEERARKA ISKUULKA

Xeerarka iskuulku waxaa ku qoran sidda iskuulku u shaqeeyo, si iskuulku u noqdo meel nabad galyo ah deganaasho leh.

KIELIOHJELMA / LUQADAHA LA DHIGO

luqadaha lugu dhigo iskuuladda magaalladda

KIVA KOULU –OHJELMA / ISKUULKA WACAN

Waxaa la diyaariayay mashruuc loo bixiyay iskuul wacan, kaaso o ujeedadiisu tahay sidii loo yarayn lahaa ama looga hortagi lahaa dhibaatooyinka iskuulka ka dhaca.

KODIN JA KOULUN YHTEISTYÖ / WADDA SHAQAYNTA ISKUULKA IYO GURIGGA

Waxaa loola jeedaa shaqaalaha iskuulka iyo waalidiintu sidii ay iskaga warqabi lahaayeen, taasina waxay u fiican tahay wax-barashadda ardayga. waxaa jira ururka waalidiinta kaaso oo qabta howshaas.

KOULUKIUSAAMINEN / TAKOORIDDA ARDAYGGA

Arday takoor, dhibid soo noqnoqata. Takooridda marna loo dulqaadan maayo waa in marwalba wax laga qabtaa.

KOULUKULJETUS / SAFARKA ISKUULKA

Haddii iskuulka iyo gurigu isku jiraan 5 kiilomerti iyo in ka badan, iskuulka baa bixina kharajka safarka. ardaygu xaq buu u lee yahay safar lacag la`aan haddii dadiisa iyo koriimadiisuba u dulqaadan Karin in uu raaco gaddidka dadwaynaha.

KOULUKURAATTORI / MACALINKA DISHIBILIINKA

Macalinkaana shaqadiisu waa in uu kobciyo is dhexgalka ardaydda iyo in uu caawiyo ardayga sidii iskuulka u dhigan lahaa.

KOULUN KERHOTOIMINTA / NAADIYAASHA ISKUULKA

Iskuulku wuxuu diyaariyaa naadiyaal kala gadisan.
Waxaana naadiyaashaas laga qayb galaa xisadaha markii ay dhamaadaan. Waxaana ka qayb qadanaya ardaygii doonaya.

KOULUNKÄYNTIAVUSTAJA / CAAWIYE

Wuxuu caawiyaa macalinka iyo ardaydda..

KOULUPSYKOLOGI / CILMI NAFSIGGA ISKUULKA

cilmi nafsigu shaqadiisu waa in uu caawiyo ardaydda dhan caafimaadka, koriimadda, is dhexgalka iyo waxbarashadaba.

KOULURUOKAILU / CUNTADDA ISKUULKA

ardaygu wuxuu ku lee yahay iskuul cunto lacag la`aan ah, isla markaasna waxaa la barayaa cuntooyinka nafaqooyinka leh.

KOULUTERVEYDENHUOLTO / MAARAYNTA CAAFIMAADKA ISKUULKA

Maareeynta caafimaadka iskuulka u jeedadiisu waa in lala socdo ardayga koriimadiisa, caafimaadkana waxaa soo galaaya ilka. Iskuulka waa jooga kalkaaliso caafimaad iyo dhakhtarba.
KURINPITO Cinqaab
Ardayga waa la cinqaabayaa haddii uu jabiyo xeerarka u yaal waxbarashadda ama xeerarka u yaal iskuulka. Cinqaantaasna waa mid waafaqsan xeerarka waxbarashadda.

KURSSIMUOTOISUUS / KOORSOOYIN

Manhajdka waxaa loo qaybinayaa koorsoosin 4 ilaa 6 koorso.

LASTENSUOJELUN ILMOITUSVELVOLLISUUS / WAAJIBKA OGAYSIINTA BADBAADADDA CARUURTA

Masuulliyiinka waxbarashadda waxaa saaran waajib ay ku ilaalinayaan ardaydda. Waxaa in ay ayaga oo aan dib u dhigin ay ogaysiiyaa masuuliyiin ay khsayso haddii ay arkaan in ardayga koriimadiisa, waxbarshadiisuba ku jirto halis.

LEIRIKOULU / ISKUUL KAAMKA

Iskuulka kaamku wuxuu ku jiraa manhajdka waxbarshadda, kaaso o lugu qabto meel ka baxsan iskuulka Waaliku waa ka qaybqaadan karaa qorsha iskuulka kaamka, laakiin waxaa suurta galina iskuulka.

LISÄOPETUS / WAXBARASHO DHEERAAD AH

ardaydda dhamaysay dugsiga hoose dhexe waxaa la siinayaa sanad waxbarasho ah oo dheeraad ah, waxaana ka qayb qaa-danaya ardaygii doonaya.

LUKUVUOSI / SANAD DUGSIYEED

Sanad dugsiyeedku wuxuu bilowdaa 1 Agosto wuxuuna dhamaadaa 31 july. Magaaladda baa go´aamiso xilliga iskuulku fur-maayo iyo xilliga fasaxa la galaayo. Sanad dugsiyeeka waxaa loo qaybiyaa labo xilliga dayrta iyo xilligga gu ga. Sanad dugsiy-eedku waa 190 cisho oo shaqo ah.

LUOKANVALVOJA / FOOMASTER

Dugsigga dhexe macalin maado dhiga baa noqonaya foomaster, kaasoo masúul ka ah baahidda fasalkaas sida maqnaasha iyo la xiriiridda waalidka.

LUOKKARETKI / SAFARKA FASALKA

Ardayda ama waalidku waxay qorshayn karaan safar, kaaso o iskuulku uu masúul ka ahayn.

LÄHIKOULU / ISKUULKA NAWAAXIDDA

Magaaladda baa ardayg u tilaamaysa iskuulka ugu dhow. Iskuulka nawaaxigu waa iskuulka ugu dhow gugurigiisa, kaaso o safarkana ugu fudud

MAI-OPETTAJA / MACALINKA MAI

Macalinka dhiga luqadda hooyo iskuuladda Turku

OMO-OPETTAJA / MACALINKA OMO

Macainka maadooyinka ku dhiga luqadda hooyo iskuuladda Turku.

OPETUKSEN ERIYTTÄMINEN / HABKA WAXBARASHO

Macalinku wuxuu sahlayaa siddii ardaygu si fudud u fahmilahaa waxbarshadda taas micnaheedu yahay in arday walba la siiyo fursad uu wax ku barto

OPETUKSEN PAINOTTAMINEN / KU TAKHASUSID MAADOOYIN

Iskuuladda waxay ku takhasusi karaanmaadooyin gaar ah sidda musiikiga, .farshaxanka, deegaanka iyo dabiicigga ama fariin gudbinta.

OPETUKSEN YKSILÖLLISTÄMINEN / KHAFIIFINKA WAXBARSHADDA

Haddii ardayga waxbarshadu ku adkaato waxaa loo khafiifinayaa maadooyinka.

OPETUSSUUNNITELMA / MANHAJKA WAXBARASHJADDA

Manhajka waxbashadu waa dukumiiti ay ku qoran yihiin wixii, goortii iyo siddii wax loo baran lahaa. waana in lugu dhaqmaa qorshahaas.

OPINTO-OHJELMA / BROGRAMKA WAXBARASHADDA

Brogramkaas waxaa lugu xusaa maadooyinka iyo kooxda wax is la baranaysa.

OPINTORETKI / SAFAR WAXBARSHADDA

Safarka waxbarsho wuxuu ku jiraa qorshaha waxbarashadda, wuxuuna kor usoo qaadnayaa aqoonta ardayda, waxaana la qabanayaa xilliga iskuulka la dhigto. Waa in macalinku uu ka qaybqaataa, Waalidku waa ka qaybqaadankaraa.

OPPILAAN ARVIOINTI / DHIBCO SIINTA ARDAYGA

Arday walba waxaa lugu qiimaynayaa imtixaanka wuxuu ka keeno, sidda uu ula socdo xisadda, ka qashaynta layliyada. Man-hajka waxbarshadda bayna ku qoran tahay maaado walba inta uu ka yaqaano lambarka u dhigma.

OPO = OPPILAANOHJAAJA / ARDAY HAGE

kooxarday haguhu wuxuu siiyaa maado kali ama koox.

OPPILAANOHJAUS / HAGIDDA ARDAYGA

Ardayga waxaa caawiyaa siddii uu wax u baranlahaa ama uu u dooran lahaa waxbarsho ku haboon khaas ahaan markii uu dhamaynayo dugsigga hoose dhexe.

OPPILASHUOLTO / TAXADARKA ARDYGA

Taxadarka argyga u jeedadiisu waa siddi ardaygu uu si fiican wax u baran lahaa xag jismi iyo jirba.

OPPILASKUNTA / GUDIGGA ARDAYDA

Iskuul walba wuxuu lee yahay gudi, kaaso o leh gudi fulin ah. Gudigaas wuxuu ka qayb qaataa shaqadda iskuulka. Ujeedadiisu waa sidii u kobcin lahaa wadda shaqaynta iyo ardayna loo maqlihaa waxyaabaha ay soo jeedinayaan.

OPPIMISEN JA KOULUNKÄYNNIN TUKI / CAAWIMAADDA WAXBARSHADDA IYO ISKUU DHIGASHADDA

Arday walba xaq buu u leeyay in lag caawiyo koriimadiisa iyo waxbarshadiisaba. Caawimaadaas waa in ay noqotaa mid fudud lugu helo, islana badasha baahidda. Waxbarshadda waxaa loo qaybiyaa mid guud, mid dhexe iyo mid khaas ah. caawimaad-dana waxaa loo ban dhigayaa waalidka iyo ardaygaba.

OPPIMISSUUNNITELMA / QORSHE WAXBARSHO

Ardayga waa loo diyaarinayaa qorshe uu waxku baran lahaa, taas oo ay ku qeexan tahay caawimaadda uu u baahan yahay iyo siddii loo wax loo baraaayo.

OPPIMISTAVOITTEET / HADAFKA WAXBARSHJADDA

Hadafka waxbarshadda waxaa ku cad waxa la hiigsanaayo hadafkaas wuxuu noqon karaa waxbarsho guud ama maado.

OPPIMÄÄRÄ / CASHARO

Maado walba waxay lee yahay casharo go`an. Dugsigga hoose dhexe wuxuu ka kooban yahay sagaal sano. Maado kasta cashoro kal gadisan baa loo qrsheeyay.

OPPIMÄÄRÄN YKSILÖLLISTÄMINEN / KHAFIIFINKA MAADOOYINKA

Marka kowaad ardaygu waa in uu ka qaybqaataa waxbarshadda guud. haddii uu awoodiwaayo caawimaad ka dib, waxaa loo khafiifinayaa maadoopyinka si uu u gaaro hadafkii laga lahaa waxbashadda..

OPPIVELVOLLISUUS / WAAJIBKA WAXBASHADDA

Waajibka waxbarshadu wuxuu bilowdaa sanadka uu ardaygu buuxinaayo todobo sano, wuxuuna dhamaadda markii uu dha-meeyo dugsigga dhexe ama toban sano ka soo wareegtay markii uu iskuul bilaabay. Waalidka waa in uu taxadar iska saaraa sidii loo dhamayn lahaa dugsigga hoose dhexe.

PERUSOPETUS / WAXBARSHADDA AASA AS KA AH

Waxbarshadda aas aaska ah waa fasaladda 1.- 9.waxaan lugu dhigtaa dugsigga hoose dhexe ama gurigga, dugsiga galabtii ama maxad, kuwaas lugu dhigto waxbarshadda aas aaska ah.

PIDENNETTY OPPIVELVOLLISUUS / KORDHINTA WAALIBKA WAXBARSHADDA

Haddii ardaygy dhaawac ama jiro awgeed uu u gaari karin hadafkii waxbashadda sagaalsano, waxaa looga dhigaa 11 sano.

PIENRYHMÄOPETUS / FASAL TIRO YAR

Waxaa la diyaarin karaa fasal tiro yar si loo gaaro hadafkii waxbarshadda.

REISSUVIHKO/WILMA / BUUGA FARIIMAHA/WILMA

buugga fariimaha waxaa fariimaha isku waydaarsadda waalidka iyo macalinka, waxa kale oo la isticmaalaa Wilma, kaaso o ah aalad internet ah oo ka shaqaysa wadda shaqaynta gurigga iyo macalimiinta..

TET

TET waxaa loo soo gaabshay u kuurgalidda shaqooyinka. Ardaygu wuxuu lee yahay asbuuc uu shaqo u aadayo meel si uu ogaado wuxuu rabo mustaqbalka.

TODISTUKSET / SHAHAADO

Waxbashaddda aas aaska ah waxay leedahay shahaadooyinkaka kala ah shahaado sanadeed, shahado xilliyeed, shahaado joojin iyo shahaado qalin jabin. Shahaado sanadeed waxaa la bixiyaa markii sanadku dhamaado, shahaado xilliyeed waxaa la siiyay markii sanadku kala bar yahay. Shahaado joojina waxaa la bixiyaa markii ardaygu iskuulka badasho. Tan qalin jabintana waxaa la bixiyaa markii dugsigga hoose dhexe la dhameeyo.

TUKIOPETUS / WAACINID

Caawimaadaan waxaa la siiyaa ardayga ka dib dhacay ardayda kale, waana ku meel gaar ee joogto ma aha. caawimaadaan waa in la bilaabaa markii la dareemo in ardayga waxbarashadu ku adag tahay.

TURVALLISUUS / NABADGALYO

Iskuulku waa in uu ahaadaa meel nabad ah, waana in uu leeyahay hagid haddii waxdhcaan sidii la samayn lahaa. Qorshaha loo dhaqmaayo haddii wax dhacaan waa in shaqaalah, waalidka iyo ardayduba og yihiin.

VANHEMPAINYHDISTYS / URURKA WAALIDKA

Waalidka ardaydu waxay samaysan karaan urur. Ururkaasu wuxuu la shaqaynayaa ardayda iyo shaqaalaha iskuulka.

VALMISTAVA OPETUS (VALMO) / WAXBARASHADDA DIYAARINTA

Waxbarashadaan diyaarinta ah waxaa la siiyaa lix jirka iyo ardayda ajnabiga ah oo ku jira xillii waajibka waxbarashadda, ujee-daduna waa in loo carbiyaa waxbarshadda.

WILMA

Wilma waa habka iskuulku ku soo gudbiyo warbiximihiisa. Wilma waalidku iyo ardayguba wuxuu kala socon karaa dhibcihiisa, maqnaashihiisa iyo lasocodka xisadaha.

VÄLITUNTI / BIRIRIF

Waa xilliga firaaqadda ah oo u dhaxaysa labadda xiso.

YHTEISHAKU / CODSIGGA GUUD

Waa codsi guud oo waddanka oo dhan looga codsado iskuuladda ku xigga waxbarashadda aas aaska ah.